



Haddii adigu aad leedahay naafonimo oo ay da'daaduna u dhaxeyso 14 iyo 24, waxaa lagaa caawin karaa dhisidda xirfadaha shaqo, sahaminta danaha xirfadeed iyo barashada u doodista naftaada marka aad shaqada joogto.

Waa Maxay Adeegyada Kala-guurka?

Qaybta Tababbarada Farsamo iyo Kuwa Mihnadeed ee DSHS waxaa ay bixinaysaa Adeegyo Kala-guur lagu taageerayo oo lagu hagayo ardeyda iyo dhallinyarada naafada ah marka ay u diyaar-garoobayaan cududda shaqaalaha.

Adeegyada Kala-guurka waxaa ay ka caawin karaan dhallinyarada iyo ardeyda:

- Dhisidda xirfado shaqo.
- Sahaminta danaha xirfadeed.
- Kor-u-qaadista xirfadaha isu-doodista.

Awoodsiinta Kala-guurkaaga Nolosha ee Dugsiga Sare Kadib

Khariiradda Kala-guurka ee Gobolka Washington waa kheyraad ay iska kaashadaan shirkado kala duwan oo sharxaya adeegyada kala-guurka muhiimka ah ee ay heli karaan dadka naafada ah iyo qoysaskooda. Khariidadda oo 12 luuqadood ah ka eeg halkan www.wsarcwa.org/transition-map.

Marka la joogo DVR, waxaan istusnaa mustaqbalka ardayda, dhallinyarada, iyo dadka waaweyn ee naafada ah ay ku riyoon karaan wax weyn oo ayna gaari karaan hadafkooda shaqo.

Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington Qaybta Tababbarada Farsamo iyo Kuwa Mihnadeed

PO Box 45340 | Olympia, WA 98504-5340
1-800-637-5627 | Washington Relay: 711

DVRCSR@dshs.wa.gov
dshs.wa.gov/dvr

Bixinaysay Adeegyada DVR Tan iyo 1933

Adeegyada Kala-guurka Ardeyda iyo Dhallinyarada



Qaybaha Adeegga Kala-guurka Shaqaaleynta-Kahor

Shaqo Sahamin

Wax ka ogow goobaha shaqada kala duwan, waa maxay danaha shaqo ee laga yaabo in aad leedahay iyo xirfadaha laga yaabo in aad u baahan tahay in aad yeelato si aad u guuleysato.

Tababbarka U-diyaar-garowga Goobta Shaqada

Wax ka ogow oo baro xirfado si aad ugu diyaar-garowdo shaqo, oo ay ku jiraan xirfadaha nolosha madax-bannaan ee shaqada la xiriira.

Isu-Doodis

Wax ka ogow oo baro xirfado ku saabsan sida aad isu doodi karto ka-dibna codso waxyaabaha aad u baahan karto si aad u guuleysato.

La-talinta Waxbarashada Dugsiga Sare Ka-dib

Baro oo hel hagid ku saabsan ikhtiyaarada waxbarashada joogtada ah iyo tababbarka ka-dib dugsiga sare ee waxyaabaha aad daneynayo iyo awoodahaaga.

Barashada Shaqada-Ku-Saleysan

Fursadda ka-qaybgalka hawlaho si aad wax uga oggato goobta shaqada ee bulshadaada.



Iskuulka-ilaa-Shaqada

Barnaamijka Iskuulka-ilaa-Shaqada wuxuu taageeraa ardeyda leh naafonimada caqliga iyo koritaanka. Dheefaha Iskuulka-ilaa-Shaqada waxaa ay noqon karaan:

- In ardeyda la siiyo fursad ay shaqo ku helayaan ka hor inta aysan qalinjebin oo aysan iskuulka ka bixin.
- Ka caawinta ardeyda ku xirnaanta adeegyada qaangaarka ee muhiimka ah ee caawin kara.
- Ku dhiirrigelinta ardeyda in ay door firfircoon ka qaataan qorsheynta mustaqballoodaa.

Ka eeg faahfaahinta barnaamijka oo dhammeystiran halkan www.dshs.wa.gov/dvr/school-work.

Sida looga Qaybqaato

Ardeyda iyo dhallinyarada naafada ah waxaa ay heli karaan Adeegyada Kala-guurka, laakiin noocyda adeegyada ay heli karaan koox kasta waa ay kala duwan yihii. La xiriir la-taliyaha kala-guurka gobolka ama la-taliyaha baxnaaninta mihnadeed ee degaankaaga si aad u bilowdo.

Wax Badan Ogow oo La Xiriir DVR

www.dshs.wa.gov/dvr/student-and-youth-vr-transition-services



Baahiyada

Qof walba oo u baahan gargaar dheeraad ah ama adeeg loogu talagalay wadahadalka wax-ku-oolka ah, fadlan la xiriir dvr.languageaccess@dshs.wa.gov.

Haddii aad u baahan tahay in baahi lagaa qaabtiro ama wax-ka-beddelka siyaasado ama habraacyo aad uga qaybgaleysid barnaamij, adeeg, ama hawl DHS, fadlan kala xiriir Isuduuhaha DVR ADA si baahidaada lagaaga haqabtiro ama wax-ka-beddel emailkan DVRADACoordinator@dshs.wa.gov.

Bayaan Maaliyadeed

Maaliyadaha gobolka iyo kuwa federaalka ayaa loo adeegsadaa bixinta adeegyada DVR. Barnaamijka VR wuxuu qiyaastii helaa boqolkiiba 78 oo Maaliyadaha federaalka ah iyo boqolkiiba 22 oo maaliyadaha gobolka ah. Si aad u hesho macluumaadka faahfaahsan ee qaddarka lacagta maaliyadaha federaalka ee barnaamijka loogu talagalay, fadlan booqo <https://rsa.ed.gov/fiscal/grant-awards>.